

Jamhuuriyadda Somaliland



**WASAARADDA WARFAAFINTA,
DHAQANKA IYO WACYIGELINTA**

**QORSHE-SANNADEEDKA
2020-2021**

Waxaa daabacday:

Waaxda Qorshaynta iyo Istastikadda

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL

Email: planningmoicg@gmail.com | **Tell:** + 252634100120

Cinwaan: Degmadda 26ka June, Wadadda Idaacadda

Web: www.warfaafintajsl.com

© Jeeniwari 2019

Xuquuqda Daabacadu waxa ay u dhawrsoon tahay Wasaaradda Warfaafinta,
Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL

*“Nin dariiq xariiqdaa
Garan kara dayowdaye
Dhidarkii ku kacay danab
Doc kastaaba waa u toos”*
— Abwaan Gaarriye (AHN)



GOGOL DHIG

Qorshe-sannadeedka 2020-2021 ee Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta Jamhuuriyadda Somaliland waa mid ku sallaysan Higsiga 2030 ee Qorshaha Horumarinta Qaranka. Qorshe-sannadeedka waxa saldhig u ah miisaaniyadda Qaranka iyo barnaamij-siyaasadeedka Xisbiga talladda haya ee KULMIYE. Si loo xaqiijiyo Higsiga 2030, Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa ka go'an in ay horumariso addeega warbaahineed, dhaqan iyo ka wacyigelineed ee ay ugu xil-saaran tahay Qaranka Somaliland si ay door laxaad leh uga cayaarto ilaalinta midnimada bulshadda, geeddi-socodka dimuqraadiyadda, sareynta sharciga iyo adkaynta nabadgelyadda guud ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa mudnaan u ah sidii loo curin lahaa ama dib-u-habayn loogu samayn lahaa siyaasadaha iyo xeerarka khuseeya shaqadda Wasaaradda. Haatan waxa naqtiim dhamaystiran lagu sameeyey Xeerka Saxaafadda, kaas oo fududayn doona xaqiijinta nidaam dhammaystiran oo lagu maamulayo dhammaan addeegayadda warbaahinta kala duwan ee Dalka ka jira. Sida ku cad qorshaha Wasaaradda Warfaafinta, waxa aannu sida ugu dhakhsiyaha badan u samayn doonnaa dhammaan siyaasaddaha lagu hagayo/maamulayo warbaahinta, dhaqanka iyo wacyigelintaba.

Ka maamul wasaarad ahaan, waxa aanu muhiimada koowaad siinaynaa sidii loo heli lahaa Idaacad Weyn oo Dalka iyo guud ahaanba Gobolka Beriga Afrika laga wada dhagaysto. Sidoo kale, waxa noo qorshaysan in aanu isbedel muuqda oo toggan ka samayno habka baahinta ee Reedhiyow Hargeysa iyo Telefishanka Qarankaba. Si taas loo gaadhana, waxa aan sida ugu suurtagashan uga faa'iidayaan doonnaa tiknoolojiyadda cusub, taas oo noo suurtagelin doonta in si toos ah Idaacaddaha iyo Telefishankaba loo dhegaysto ama loo daawado, sidoo kalena laga heli karo Baraha Bulshadda iyo mareegta Wasaaradda.

Annaga waxa naga go'an in aan sii libin-laabno dadaalka aan ugu jirno kobcinta saxaafadda madaxabannaan iyo hiddaha soo-jireenka ah ee ummadeena. Sidaas darteed, yoolkaygu waa wanaajinta addeega aan u hayno muwaadiniinta Somaliland iyo soo-bandhigista waxqabadka xukuumadda, qorshayaasheeda iyo dhaqdhaqaaq kasta oo siyaasadda xukuumadda iyo horumarka qaranka ka turjumaya. Ugu danbayn, waxa aan u mahadnaqayaa dhammaan agaasimayaasha-waaxyaha ee ka wada-qaybgalay in Wasaaraddu soo saarto qorshe-sannadeedkeeda. Si gaar ah waxa ammaan iyo mahadnaq u mudan Waaxda Qorshaynta iyo Istastistikadda doorkii hoggaamineed iyo farsamo ee ay ka qaadatay in la soo saaro buug-yaraha Qorshe-sannadeedka 2020-2021.

Saleebaan Yuusuf Cali (Koore)

Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyigelinta

TUSMO

GUUDMAR	10
HORDHAC.....	11
HIGSIGA, TUBTA IYO UJEEDDADA.....	12
Higsiga.....	12
Tubta.....	12
Ujeeddo Guud.....	12
Ujeeddooyinka Gaarka Ah	13
Maba'aadidda Lagu Hago Wasaaradda	14
QAAB-DHISMEEDKA WASAARADDA.....	15
QORSHAHA HORUMARINTA QARANKA II	18
MIISAANIYADDA WASAARADDA.....	20
QORSHE-HAWLEEDKA.....	22
WAAXYAHA	22
1. Waaxda Qorshaynta	23
2. Waaxda Maamulka iyo Xisaabaadka	30
3. Waaxda Maaraynta Cudduda Shaqaalaha	32
4. Waaxda Wakaaladda Wararka Somaliland (SOLNA)	36
5. Waaxda DAWAN	38
6. Waaxda Idaacaddaha	40
7. Waaxda Telefishanka Qaranka Somaliland (SLNTV)	43
8. Waaxda Filimada.....	45
9. Waaxda Dhaqanka	47
10. Waaxda Wada-Xidhiidhka Qaranka.....	49
11. Waaxda Farsamadda.....	52
12. Waaxda Wacyigelinta.....	54
FULLINTA QORSHE-SANNADEEDKA.....	56
KORMEERKA IYO QIIMEYNTA	58

GUUDMAR

Qorshe-sannadeedka 2020-2021 waxa uu ka turjumayaa himilooyinka, higsiga iyo hawlqabadka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta Jamhuuriyadda Somaliland. Waa mid loola jeeddo in uu wax weyn ka taro rumaynta riyadda Wasaaradda ee la xidhiidha kobcinta wacyiga iyo heerka garaadka waddaniyadeed ee bulshadda Somaliland, iyada oo bulshadda ka haqab-tiraysa hellida addeegyada warbaahineed oo madaxabannaan, kuwaaas oo soo tebiya warar iyo xoggo sugan, qaybna ka qaata adkaynta midnimada ummada, ilaalinta iyo difaaca Qaranka.

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa ay u jeexday tub lagu gaadhayo yoolkeeda iyada oo dardargelinaysa hawlaha la xidhiidha diyaarinta siyaasadda iyo xeerka khuseeya shaqadeed, dib-u-habaynta shaqadda waaxaha Wasaaradda, qalabaynta iyo casriyeynta qalabyada farsamo iyo tayeynta barnaamiyadda, wararka iyo baahinta Reedhyow Hargeysa iyo Telefishanka Qaranka.

Qorshe-sannadeedka 2020-2021 waxa uu si mug iyo miisaan leh u iftiimin doonnaa qorshayaasha mudnaanta u ah Wasaaradda sannadka 2020-2021, horumarka lagu tallaabsanayo iyo guud ahaan sida loo wanaajinayo habka bixinta addeegyadda ee Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta Jamhuuriyadda Somaliland.

Qorshahan waa mid waafaqsan Qorshaha Horumarinta Qaranka II ee lagu gaadhayo Higsiga 2030, taas oo la rabo in la xaqiijiyo in bulshada Somaliland noqoto bulsho cilmi ku dhisan. Fikirka diyaarinta qorshe-sannadeedku waxa uu ku dhisan yahay in Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL noqoto haya'ad ku sifowda hufnaan iyo karti, daacadnimo iyo isla-xisaabtan, si loo suurtoogeliyo in muwaadin kasta xaqiisa Dastuuriga ah ee ra'yi-dhiibashada u rumowdo, isla markaana la helo warbaahin u madax-bannaan shaqadeeda, kunna dhaqanta qiyamka iyo qawaaniinta Dastuurka Somaliland ogol yahay.

HORDHAC

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta ee Jamhuuriyadda Somaliland waa tan ugu da' weyn hay'addaha warfaafineed ee Soomaalida, waxa ayna leedahay taariikh dheer oo ilaa dhawr iyo toddobaatan sanno ah, waxa ayna soo martay isbedello kala duwan. Waaxdii ugu horraysay waxa ay ahayd Reedhyow Hargeysa oo la aasaasay sannadkii 1942-kii (waxa la odhan jirey waqtigaasi 'Radio Kudu').

Markale, Reedhyow Hargeysa waxa dib loo yagleelay horraantii 1991kii, kadib dagaaladdii dib loogula soo noqday xorriyaddii Somaliland. Waxa bilaabmay soo-bixitaankii jaraa'idka madaxabannaan sida Codka Hargeysa, Xorriyo, Jamhuuriya iyo Geeska Afrika oo ay Wasaaradda Warfaafintu door laxaad leh ka cayaari jirtay dhiirigelinta wax-soo-saarka warbaahineed iyo jiritaankoodaba. Waaxda Qorshaynta, Waaxda Maamulka iyo Xisaabaadka, Waaxda Maaraynta Cudduda Shaqaalaha, Waaxda Telefishanka Qaranka, Waaxda Wakaaladda Wararka, Waaxda Dawan iyo Waaxda Dhaqanka oo ay hoos yimaaddaan fanka iyo sugaanta, fannaaniinta iyo jilayaasha qaranka, ayaa iyagana lagu soo kordhiyey qaab-dhismeedka Wasaaradda, si ay u gudato waajibeedka qaanuuniga ah.

Si kastaba ha ahaatee, isbedelladaas ku saabsan korodhka iyo horumarinta Wasaaradda Warfaafintu waa kuwa socda ilaa iyo haatan, lanna jaanqaadaya horumarka iyo isbedelka bulsho, siyaasad iyo dhaqan-dhaqaale. Maamulladii kala danbeeyey ee soo maray Wasaaraddu waxa ay dib-u-eegis ku samayn jireen qaab-dhismeedka guud ee Wasaaradda, si ay addeega warbaahineed ee ay qaranka u hayso u noqdo mid hufan oo ka tarjuma isbedelka nololeed ee bulshadda Jamhuuriyadda Somaliland.

Qorshe-sannadeedka 2020-2021 waa mid hagge u noqon doona jihada ay Wasaaraddu u tallaabsan doonto, unna fullin doonto addeegyadda warbaahineed, dhaqan iyo Wacyigelineed ee ay masuulka ka tahay. Qorshahan waxa ka muuqda qaab-dhismeedka Wasaaradda iyo guud ahaan habka ay waaxyaha kala duwan ee Wasaaraddu u midayn doonnaan tacabkooda, si loo rumeeyo filashada Qorshaha Sannadka. Fullinta qorsheyaasha waaxyaha kala duwan waxa lagu cabiri doonnaa hadba sida maxsuulka loo gaadho, iyada oo cabbir sugan laga qaadan doonno halbeegyadda hawlqabadyadda lagu xusay qorshe-sannadeedka.

HIGSIGA, TUBTA IYO UJEEDDADA

Higsiga

Higsiga Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelintu JSL waa kobcinta wacyiga iyo heerka garaadka waddaniyeed ee bulshadda Somaliland, iyada oo bulshadda ka haqab-tiraysa helidda addeegyo warbaahineed oo madaxbannaan, kuwaas oo soo tebiya warar iyo xoggo sugan, qaybna ka qaata adkaynta midnimadda ummadda, ilaalinta karaamada iyo difaaca qaranka iyo habsami-u-socodka horumarka bulshadda.

Tubta

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL si ay u gaadho higsigeeda waxa ay u maraysa tubta hoos ku qoran:

1. Wargelinta, waxbaridda iyo madadaalinta bulshadda Somaliland;
2. Dejinta iyo curinta siyaasaddo iyo xeerar lagu horumarinayo warbaahinta, laguna dhiirigelinayo ilaalinta hiddaha iyo dhaqanka soo-jireenka ah,
3. Faafinta warbixinaha ku saabsan siyaasaddaha, barnaamijyadda iyo guulaha Xukuumadda, iyada oo ilaalinaysa xorriyada saxaafadda iyo warbaahinta guud ahaan;

Ujeeddo Guud

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta ujeeddadeeda guud waa hoggaaminta, maamullida iyo diyaarinta siyaasaddaha iyo xeerarka lagu horumarinayo warbaahinta madaxabannaan iyo kuwa dawladda, loonna ilaalinayo hiddaha iyo dhaqanka Jamhuuriyadda Somaliland.


Ujeeddooyinka Gaarka Ah

Ujeeddooyinka gaarka ah ee Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL, iyaga oo ku xidhiidhsan higsiga Wasaaradda, waxa lagu faahfaahiyey shaxanka hoos ku dhigan:




Maba'aadidda Lagu Hago Wasaaradda

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa ay leedahay qiyam iyo maba'aadi lagu maamulo shaqada iyo addeega ay u hayso muwaadiniinta Somaliland. Kuwaas oo ay ka mid yihiin kuwa hoos ku qoran:



QAAB-DHISMEEDKA WASAARADDA




WAAJIBAADKA WASAARADDA

Sida ay dhigayaan Xeer-nidaamiyaha Dhismaha Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Xukuumadda (**Xeer Nidaamiye Lr. 01/2018**) iyo Xeerka Kala Xadeynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'addaha Madaxabannaan (**Xeer Lr. 71/2015**), waajibaadka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyi-gelinta JSL waa:

1. Samaynta siyaasad guud oo kor loogu qaadayo wacyiga iyo heerka garaadka waddaniyadeed ee muwaadiniinta reer Somaliland.
2. Ku wacyigelinta muwaadiniinta gudashada waajibaadka ka saaran bixinta cashuurta, ilaalinta deegaanka, dhawrida Dastuurka iyo xeerarka Dalka.
3. Dammaanad qaadida saxaafad xor ah oo ka duusha, maba'aadidda Islaamka, qiyamka iyo hiddaha suuban ee ummadeena.
4. Horumarinta idaacadaha, wargeysyada, shabakadaha “Internet” iyo muuqaal araga “TVga” dawliga ah iyo kuwa madaxabannaan.
5. Bixinta ruqsadaha warbaahinta gaarka loo leeyahay.
6. Dhiirigelinta warbaahin Xukuumadda iyo dadku wada leeyihiin si loo helo warbaahin tayo leh oo xor ah.
7. Ku wacyigelinta muwadiniinta jacaylka iyo difaaca Dadka, Diinta iyo Dalka.
8. Abuuridda iyo qaabeynta aragtida iyo hab-fikirka bulsheed, iyada oo lagu salaynayo diinteena Islaamka iyo dhaqanka suuban ee ummadeena ee soo jireenka ahaa, laguna baraarujinayo xumaanta ay leeyihiin caaddooyinka iyo dhaqamada aan ku dhisnayn diinta Islaamka iyo dhaqankeena.
9. Dejinta siyaasaddaha Xukuumadda ee ku wajahan dhiirigelinta, dhawrida iyo ilaalinta dhaqanka soo-jireenka ah ee Dalka.
10. Dhawrida aadaabta Islaamka, horumarinta suugaanta iyo dhiirigelinta hal-abbuurka, fanka iyo cayaaraha waddaniga ah,
11. Horumarinta hiddaha iyo dhaqanka suuban ee bulshadda.
12. La-dagaalanka iyo tirtirista caadooyinka wax u dhimaya diinta, horumarka, dhaqanka iyo caafimaadka.
13. Samaynta iyo dhiirigelinta carwooyinka dhaqanka.
14. Ka hortegidda iyo ka jawaabid dagaaladda warbaahineed ee dibada ka soo waajaha Somaliland.
15. Iyo xilka iyo masuuliyadaha kale ee ay ku waajibayaan Xeerarka dalku.

MUDNAANTA WASAARADDA

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa ay mudnaanta siin doontaa sannadka 2020, hawlqabadyadda hoos ku qoran:



QORSHAHA HORUMARINTA QARANKA II

Higsiga 2030 ee Jamhuuriyadda Somaliland waa in la helo “*Dal xasiloon, dimuqraadi ah oo barwaaqaysan, kaas oo dadkiisu ku naalloodaan nolol tayo sare leh.*” Hadaba, si taas loo gaadho waxa u dejisan Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Labaad, kaas oo sii faahfaahsan u qeexay doorka iyo waajibaadka ay wasaarad ama hay’ad kastaba ku leedahay Horumarka Qaranka.

Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Labaad waxa uu horseedayaa kobac dhaqaale oo degdeg ah iyo horumar waara, kaas oo waajibinaya in Wasaarad kasta qorshe-sannadeedkeedu noqdo mid ku xidhiidhsan Qorshaha Horumarinta Qaranka II. Sidaas darteed, Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL, ka sokow doorka wadareed ee ay la wadaagto wasaaradaha iyo haya’adaha kale ee Dawladda, waxa ay door laxaad leh kaga jirtaa faafinta iyo ogaalka Qorshaha Horumarinta Qaranka.

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa ay si gaar ah uga tirsan tahay **Tiirka Maamul-wanaagga ee Qorshaha Horumarinta Qaranka** (Gaar ahaan qaybta *Dimuqraadiyadda iyo Maamul-daadejinta*), iyada oo doorkeedu yahay in la helo bulsho aqoon ku dhisan oo is-dhaafsigu xogtu yahay xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadiniinta Somaliland.

Qorshe-sannadeedka 2020-2021 ee Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL waxa uu taageeraya fullinta Yoolasha Horumar Waara qodobkiisa 16aad ee ku xusan Tiirka Maamul-wanaagga ee Qorshaha Horumarinta Qaranka II, taas oo looga gol-leeyahay in lagu taageero nabadgelyadda iyo bulsho ka qayb qaadata horumarka Qaranka, heshana addeeg cadaaladeed oo loo siman yahay iyo haya’ado dawladeed oo isla-xisaabtan leh. Hadaba si taas loo xaqiijiyo Wasaaraddu waxa ay qorsheheeda ku dartay in la soo saaro siyaasadda Warbaahinta si kor loogu qaado aragti dhiibashada xorta ah ee muwaadiniinta iyo helitaanka xogta Dawladda. Sidoo kalena Wasaaraddu waxa ay wax-ka-beddel iyo kaabis ku samaysay Xeerka Saxaafadda, iyada oo la tashanaysa daneeyayaasha Arrimaha Warbaahinta. Iyada oo diiradda saaraysa horumarinta tayadda Warbaahinta, iyada oo kor loo qaadayo xirfadda iyo aqoonta saxafiyiinta si ay u noqdaan kuwo wax-soo-saar leh, unna adeega qaybaha kala duwan ee bulshada Somaliland.

Dhanka kale, qorshe-sannadeedku waa mid xoogga saaraya horumarinta iyo balaadhinta agabka war-isgaadhsiinta Qaranka, gaar ahaan iibsiga Idaacad Cusub oo dalka iyo Gobolkaba wada gaadha iyo fidinta FM-yadda Dalka. Wasaaradda waxa ay u heelan tahay in ay casriyeyso istuudiyaasha Telefishanka iyo Idaacadaha Qaranka, isla markaana soo kordhiso barnaamijyo cusub oo ka tarjumaya baahidda bulshadda. Barnaamijyadaas waxa ay noqon doonaan kuwa kor loogu qaado Hiddaha iyo Dhaqanka suuban ee bulshadda Somaliland.


Doorka guud ee ay Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL ay ku leedahay Qorshaha Horumarinta Qaranku waa in ay bulshada gaadhsiiso nuxurka iyo ujeeddooyinka Qorshaha, iyada oo wacyigelin muddaysan u samaynaysa bulshadda Somaliland, farriimahana u marinaysa Warbaahinta Dawladda sida Telefishanka Qaranka, Reedhyow Hargeysa, Wargeysadda Dawan iyo Baraha Bulshadda ee Dawladda.

Ugu danbayn, qorshe-sannadeedka 2020-2021 ee Wasaaraddu waxa uu door muhiim ah ka ciyaarayaa sidii loo gaadhi lahaa Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Labaad ee dhinacyadda dhaqanka, wacyigelinta iyo waliba dhanka warbaahint. Yoolka udub-dhexaadka u ah Qorshuhu waa in uu gaadhsiiyo farriimaha Qaranka bulshada qaybaheeda kala duwan.

MIISAANIYADDA WASAARADDA

Miisaaniyadda Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL ee sannadka 2020 waa **45,376,093,468 Slsh**. Taas oo muujinaysa korodh dhan **2.60%** (unna dhiganta 1,149,437,842 Slsh) marka loo eego sannadkii hore ee 2019 oo ay miisaaniyadda Wasaaraddu ahayd **44,226,655,626 Slsh**.

Mashaariicda Horumarineed ee ku jira miisaaniyadda sannadka 2020 waxa ugu mudan iibsiga idaacad cusub iyo dhismayaasha Wasaaradda.



QORSHE-HAWLEEDKA WAAXYAHA

1. Waaxda Qorshaynta

Waaxda Qorshaynta iyo Istastikaddu waxa ay u xil-saaran tahay qorshaynta, isku-duwida, kormeeridda, qiimaynta, cilmibaadhista iyo wada-xidhiidhka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL. Qorshe-sannadeedka waaxdu waa sidan:

Maxsuulka	Hawlqabad	Halbeeg	Goorta La Filayo												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1. Curinta Siyaasadda Warbaahinta	1.1 In la abaabulo laba kulan oo hordhac ah (<i>Focus Group Discussions</i>) oo loo qabto Ururadda Saxaafadda iyo Weriyayaasha, Saraakiisha Warbaahinta Qaabilsan ee Laamaha dawladda, Ururada Bulshada iyo Xisbiyadda Qaranka	2 kulan FGD													Sawiro Muuqaal Warbixin	
	1.2 In la diyaariyo qabyo-qoraalka 2aad ee siyaasadda Warbaahinta	Qoraalka 2aad														
	1.3 In loo gudbiyo qaybo-qoraalka 2aad ee siyaasadda Masuuliyiinta Wasaaradda	Qoraalka 2aad														
	1.4 In qabto Laba Kuln (<i>Validation Workshops</i>) si naqtiimid wada-jirta loogu sameeyo siyaasadda Warbaahinta	2 kulan														

	1.5 In wax-ka-badal lagu sameeyo Siyaasadda iyada oo lagu salaynayo talo-soo-jeedinta daneeyayaasha Siyaasadda Warbaahinta	Qoraalka Kaabista lagu sameeyey															
2. Dhamaystirka qabyo-qoraalka Xeerka Saxaafadda	2.1 In dib-u-eegis lagu sameeyo qabyo-qoraalka ugu danbeeyey ee Xeerka Saxaafadda.	Qoraalka Kaabista lagu sameeyey															
	2.2 In loo gudbiyo qabyo-qoraalka ugu danbeeyay Golaha Wasiiradda	Qoraalka Kaabista lagu sameeyey															
3. Dib-u-eegis lagu sameeyo Qorshaha Wacyigelinta Qaranka	3.1 In la qabto laba kulan (<i>Focus Group Discussions</i>) oo lagu naaqishayo Qorshaha Wacyigelinta Qaranka	2 kulan															
	3.2 In la dhamaystiro qabyo-qoraalka Qorshaha Wacyigelinta Qaranka	Qabyo-qoraalka QWQ															
4. Diyaarinta Qorshe-sannadeedka 2021-2022	4.1 In la gudbiyo shaxda qorshe-hawleedka waaxyaha ee sannadka 2021.	Shaxda Qorshaha															
	4.2 In la soo ururiyo qorshe-hawleedka Waaxyaha iyo isku duwayaasha Gobolada	Qorshaha Waaxyaha															

	4.3 In la dhamaystiro qorshe-sannadeedka Wasaaradda 2021-2022	Daabicdda Qorshaha																
5. Abbaabulida iyo qabashadda kulanada saddex-biloodka ee wasaaradda, Hay'adaha iyo daneeyayaasha shaqo-wadaagta la ah.	5.1 In lagu wargeliyo hay'adaha ka shaqeeya arrimaha warbaahinta, dhaqanka iyo wacyigelinta	Qoraaladda Martiqaadka																
	5.2 In la diyaariyo kulano gaar gaar ah oo lala yeesho hay'adaha danneeya warbaahinta, dhaqanka iyo wacyigelinta	Kulano																
	5.3 In la diyaariyo Shirwaynaha wada-tashiga wasaaradda iyo daneeyayaasha arrimaha warbaahinta, dhaqanka iyo wacyigelinta	Qorshaha Shirka																
	5.4 In la soo saaro warbixinta rasmiga ah ee Shirwaynaha wada-tashiga wasaaradda iyo daneeyayaasha arrimaha warbaahinta	Warbixinta Shirka																

6. Ka qaybgalka Kulan-kooxeedka la xidhiidha Qaybta iskuduwidda, kormeerka iyo qiimaynta	6.1 In la xoojiyo doorka ay wasaaraddu ku leedahay tiirka maamul-wanaaga dawladda	Warbixinta Shirarka														
	6.2 In laga qaybgalo kulanadda wasaaradda qorshaynta si loo gaadho qorshaha guud ee qaranka	Warbixinta Shirarka														
	6.3 In laga qaybgalo shirarka la xidhiidha kormeerka iyo qiimaynta qaranka iyo isku-duwidda	Warbixinta Shirarka														
	6.4 In la diyaariyo agabka ururinta xogaha Waaxyaha iyo is-duwayaasha Goboladda	Agabka Xog-ururinta														
	6.5 In kormeer muddaysan lagu sameeyo Waaxyaha Wasaaradda iyo Isu-duwayaasha goboladda Dalka	Warbixinta Kormeerka														
	6.6 In la soo saaro warbixinta muddaysan ee kormeerka (<i>Monitoring Report</i>) Waaxyaha Wasaaradda iyo Isu-duwayaasha goboladda Dalka	Warbixinta Kormeerka														
	6.7 In la soo saaro warbixinta muddaysan ee qiimaynta (<i>Evaluation Report</i>) Waaxyaha Wasaaradda iyo Isu-duwayaasha goboladda Dalka	Warbixinta Qiimaynta														

7. Soo saarista Warbixinta Waxqabadka 2020-2021	7.1 In la soo saaro Warbixinta Waxqabadka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta	Warbixinta Waxqabadka																				
8. Fullinta cilmibaadhis lagu samaynayo tiradda dhagaystayaasha Reedhyow Hargeysa iyo Daawadashaayas ha Telefishanka Qaranka	8.1 In la qabto hal kulan oo ah aqoon-korodhsi ku saabsan Cilmi-baadhista.	1 kulan																				
	8.2 In naqtiimid lagu sameeyo hindisaha iyo qorshaha fullinta Cilmi-baadhista	Hindise																				
	8.3 In la diyaariyo agabka ururinta xogaha Cilmi-baadhista	Diyaarinta Agabka																				
	8.4 In la soo ururiyo xogaha cilmi-baadhista ee deegaanadda Dalka.	Ururinta Xogta																				
	8.5 In la qabto hal kulan oo lagu habbeeyo xogaha la ururiyey ee cilmi-baadhista deegaanadda Dalka.	1 kulan																				
	8.6 In la qabto laba kulan oo lagu falanqaynayo xogaha la ururiyey ee cilmi-baadhista.	2 kulan																				
	8.7 In la soo bandhigo xogaha la ururiyey ee cilmi-baadhista ee deegaanadda Dalka.	Daabicidda Cilmi-baadhista																				

9. Joogtaynta kaydinta xogaha waaxyaha iyo is-duwayaasha Goboladda	9.1 In la kaydiyo xidhiidhada, tababarada, mashaariicda, barnaamijyadda, qorshe-hawleedyada iyo TOR-ka Waaxyaha	File-ka Kaydka		
10. Dib-u-habayn lagu sameeyo Baraha Bulshada iyo Mareegta Wasaaradda	10.1 In la diyaariyo qorshaha addeegsiga Baraha Bulshada iyo Mareegta Wasaaradda.	Qorshaha Baraha Bulshada		
	10.2 In la dhamaystiro nashqadaha Baraha Bulshada iyo Mareegta Wasaaradda.	Bandhigidda Nashqadaha		
	10.3 In la joogtooyo addeegsiga xogaha Wasaaradda, laguna guro Baraha Bulshada iyo Mareegta Wasaaradda.	Qoraaladda Baraha Bulshadda		
12. Xoojinta wada-xidhiidhka Wasaaradda	12.1 In la loo gudbiyo warbixinta dhiirigelinta waaxyaha sida dhamayskatiran u fulliya qorshe-sannadeedka.	Warbixinta Qorshaha		
	12.2 In la joogteeyo wada-shaqaynta isku-duwayaasha iyo waaxayaha.	Dhisidda Habka Wada-xidhiidhka		

13. Qalabaynta xafiiska Xidhiidhka Dadweynaha	13.1 In dhisme labaad loo dhiso Xafiiska Xidhiidhka Dadweynaha	1 dhisme																
	13.2 In la qalabeeyo labada Xafiis ee Xidhiidhka Dadweynaha	1 kursi, 1 miis, 1 diiwaan, 2 kombuyutar																
	13.3 In la soo saaro Warbixinta Saddex-biloodka ah ee diiwaanka Xafiiska	Warbixinta Saddex biloodka																

2. Waaxda Maamulka iyo Xisaabaadka

Waaxda Maamulka iyo Xisaabaadku waa waaxda u qaabilsan wasaaradda ilaalinta iyo maamulka hantida wasaaradda, habsami-socodka nidaamka maamulka iyo maaliyadda Wasaaradda. Qorshe-sannadeedka waaxdu waa sidan:

Maxsuulka	Hawl-qabadka	Halbeeg	GOORTA LA FILAYO												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1. Dhamaystirka xafiiska ilaalinta hantidda wasaaradda	1.1 In la furo hal xafiis oo lagu hawlgalo	1 xafiis														
	1.2 In la qalabeeyo xafiiska ilaalinta hantida	1 miis 1 kursi 1 kombuytar														
	1.3 In la diiwaangeliyo dhammaan hantidda wasaaradda															
2. Qalabayn tiyaatarka shaqada ku jira	2.1 In 100 kursi loo iibiyo tiyaatarka	100 kursi														
	2.2 In 12 daahyo cusub lagu xidho tiyaatarka	12 daah														
	2.3 In hal fadhi lagu soo kordhiyo tiyaatarka	1 fadhi														
	2.4 In si guud loo qurxiyo tiyaatarka	Dhismaha Tiyaatarka														
3. Kor u qaadida Billicda Wasaaradda	3.1 In lagu beero 130 geed wasaaradda	130 geed														
	3.2 In la keeno 30 qalabka qashinka lagu rido(Waaweyn), iyada oo la dhigayo goobaha muhiimka ah	30 qalabka qashinka														

4. In kor loo qaado badqabka iyo ammaanka wasaaradda	4.1 In la dhamaystiro dalabka qalabka <i>work-talk</i>																
	4.2 In la qaybiyo 12 waaxood ee Wasaaradda	12 Waaxood															
	4.3 In hal qol oo ku meel gaadh ah loo dhiso irridda weyn ee Wasaaradda	1 qol															
5. In la habeeyo nidaamka gaadiidka Wasaaradda	5.1 In la qiimeeyo tayadda iyo farsamadda 15 gaadiidka Wasaaradda ah	15 gaadiid															
	5.2 In si joogtaysan daryeel iyo dayactir loogu sameeyo 15 gaadiidka Wasaaradda	15 gaadiid															
	5.3 In la joogteeyo habsami-u-socodka shaqada gaadiidka wasaaraddu u hayaan shaqaalaha	15 gaadiid															
6. In la dhiso dhismayasha wasaaradda ee goboladda	6.1 In la dhiso dhismaha Laascaanood	1 dhisme															
	6.2 In la dhiso dhismaha Ceerigaabo	1dhisme															
	6.3 In la dhiso dhismaha Burco	1dhisme															
	6.4 In la dhiso dhismaha Awdal	1dhisme															

3. Waaxda Maaraynta Cudduda Shaqaalaha

Waaxda Maaraynta Cudduda Shaqaalahu waxa ay u taagan tahay dhisidda iyo kobcinta xirfadda iyo aqoonta shaqaalaha. Sidoo kale waxa ay u xil-saaran tahay qiimaynta, xaqsiinta iyo dhiirigelinta shaqaalaha Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL. Qorshe-sannadeedka waaxdu waa sidan:

Maxsuulka	Hawl-qabadka	Halbeeg	GOORTA LA FILAYO												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1. Dhammaystirka iyo Xoojinta Qaab-dhismeedka asaaradda	1.1 In la diyaariyo masuuliyadaha Waaxaha, Qaybaha iyo shaqaalaha wasaaradda	ToR													Sawirro, Warbixin	
	1.2 In la hawlgeliyo shaqaalaha iyo dibna loo habeeyo qaybaha qaab dhismeedka Wasaaradda ku xusan														Sawirro, Warbixin	
	1.3 In la dhamaystiro samaynta ID-yada shaqaalaha	ID-yo														
2. Xoojinta iyo Dhammaystirka Hab-maamulka iyo Shuruucda Shaqaalaha	2.1 In laga qaybgelo shirarka la xidhiidha qabyo-tirka buugga sharciga shaqaalaha	Shirar														
	2.2 In laga qaybgelo shirarka la xidhiidha shaqaalaha	Shirar														
	2.3 In la faafiyo Sharciga Shaqaalaha dawladda	Sharciga Shaqaalaha														
	2.4 In la dhaqan-geliyo iyo lanna faafiyo xeerka anshaxa lagu dhaqo shaqaalaha	Sharciga Shaqaalaha														

	2.5 In la diyaariyo <i>file</i> -ka shaqaalaha oo dhammaystiran	File-ka Shaqaalaha															
	2.6 In la qoro Xeer hoosaadka anshaxa shaqaalaha warbaahinta dawladda.	CoC															
3. Kor u qaadidda Tayada shaqaalaha, qiimayntooda iyo qorshayntooda	3.1 In la qiimeeyo shaqaalaha sannadkiiba laba jeer	Laba Kulan															
	3.2 In la abaalmariyo shaqaalaha	12 Shaqaale															
	3.3 In la xaqiijiyo baahiyaha shaqaale ee wasaaradda																
	3.4 Diyaarinta Tababarrada iyo horumarinta shaqaalaha																
	3.4.1 Waaxda Farsamada																
	Tababarka Taawarrada iyo War-leliska																
	Tababarka Tamarta Qorraxda																
	3.4.2 Waaxda Idaacaddaha																
	Tababarka Tifaf-tirka																
	Tababarka Habka Kaydka Xogta																
	3.4.3 Waaxda Telefishanka Qaranka																
	Tababarka Saxaafadda																
	3.4.4 Waaxda Maamulka iyo Xisaabaadka																
	Tababarka Xoghaymaha																
	Tababarka Daryeelka Gaadiidka																

3.4.5 Waaxda Qorshaynta iyo Istastikadda															
Tababarka Qorshaynta															
Tababarka Xidhiidhka Dadweynaha															
3.4.6 Waaxda Maaraynta Cudduda Shaqaalaha															
Tababarka Maaraynta Cudduda Shaqaalaha															
Tababarka Nidaamka Xog-keydinta Shaqaalaha															
3.4.7 Waaxda Wakaaladda Wararka SOLNA															
Tababar Hab-qoraalka wararka															
Tababar La socodka warqadabka															
3.4.8 Waaxda Filimmada															
Tababar Wax-soosaarka filimada															
Tababarka Muuqaal Diyaarinta iyo Saxaafadda															
3.4.9 Waaxda Dhaqanka															
Tababar Maamulka iyo Hoggaaminta															
3.4.10 Waaxda Wada-Xidhiidhka Qaranka															
Tababarka Wada-xidhiidhka Dawladda															

	Tababarka Nashqadaynta Mareegaha																	
	Tababarka Baraha Bulshada																	
	3.4.11 Waaxda Dawan																	
	Tababarka Qoraal Diyaarinta																	
4. Diyaarinta warbixinnada Shaqaalaha	4.1 In la diyaariyo Warbixinta Shaqaalaha sannadkii laba jeer																	
	4.2 In la hirgeliyo Sanduuqa Cabashada																	

4. Waaxda Wakaaladda Wararka Somaliland (SOLNA)

Wakaaladda Wararka Somaliland ee SOLNA waxa ay si rasmi ah u qaybisaa Wararka Dawladda ee ka imanaya heer tuulo, degmo, gobol iyo heer Qaran. Qorshe-sannadeedka waaxdu waa sida hoos ku qoran:

Maxsuulka	Hawl-qabadka	Halbeeg	GOORTA LA FILAYO												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1. Ku qorridda Wararka af Carabi iyo Ingriisi.	1.2 In la sameeyo mareegtii lagu baahin lahaa Carabiga	1 mareeg														
2. Soo saarista warsidaha Somaliland News Bulletin	2.1 In dib-u-eegis muddaysan lagu sameeyo nashqada warsidaha	1 nashqad cusub														
	2.2 In si joogto ah loo baahiyo warsidaha lanna gaadhsiiyo Xafiisyadda Dawladda, kuwa Ururadda aan Dawliga ahayn, Qaramadda Midoobay iyo Safaaraddaha.	Daabicista Warsidaha														

3. Qalabaynta istuudiyowga wakaaladda SOLNA iyo Xafiiska Online-ka	3.1 In waaxda loo iibiyo hal gaadhi ay wararka ku doonto kaas oo ah <i>Mini Bus</i>	1 gaadhi															
	3.2 In la helo saddex koombuyutar iyo toban rikoodh oo wax lagu duubo.	3 koombuyutar, 10 rikoodh															
	3.3 In la helo laba koombuyutar iyo qalab xafiis (laba miis iyo afar kursi)	2koombuyutar, 2 miis, 4 kursi															
4. Ka dhigista Wakaaladda isha ugu horraysa ee wararka Dalka laga xigto	4.1 In la diyaariyo hindise lagu codsanayo in Hay'adaha Dawladdu wararkooda u gudbiyaan Wakaaladda	1 hindise															
	4.2 In hindisaha la horgeeyo Golaha Wasiiradda	1 hindise															
	4.2 In la mideeyo wararka ka baxa warbaahinta Dawladda.	Nuqul Wareed															

5. Waaxda DAWAN

Wargeyska Dawan waxa uu ka turjumaa gudbinta siyaasadda xukuumadda ee dhinacyada horumarka, nabadgalyada, kor u qaadista kaabayaasha dhaqan-dhaqaale ee dalka, isaga oo ku gudbinaya war, sawir iyo faalooyinba. Waxa aanu soo saaraa saddex wargeys oo kala ah Dawan oo af-Soomaali ah, Wargayska *Qarnul Ifriiq* (Carabi) iyo *Horn Tribute* (English).

Maxsuulka	Hawl-qabadka	Halbeeg	GOORTA LA FILAYO												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1. Horumarinta qaybta online-ka Wargeysyadda	1.1 In loo asteeyo koox (ka kooban afar qof oo IT-ga aqoon u leh) maamulka mareegta Wargeyska	4 qof													Sawiro, Warbixin	
	1.2 In la qalbeeyo xafiiskii ay ku shaqayn lahayeen	2 kombuyutar, 2 miis 2 kursi													Sawiro, Warbixin	
2. Qalabaynta Xafiiska wararka ee Wargeysyadda	2.1 In la helo laba kombuyutar, laba kamaradood iyo laba rikoodh oo casri ah.	2 kombuyutar, 2 kamaradood, 2 rikoodh													Sawiro, Warbixin	
	2.2 In kor loo qaado tayadda wararka iyo barnaamijyadda ee wargeysyadda.	Nuqul Wargeyska													Sawiro, Warbixin	
	2.3 In bulshadda ku xidhan wargeysyada laga haqabtiro baahiyadooda wareed iyo barnaamijyeed.	Warbixinta Kormeerka													Sawiro, Warbixin	
3. Kor-u-qaadida tiradda	3.1 In wargeysyadda la gaadhsiiyo dhammaan lixda	6 gobol													Sawiro, Warbixin	

akhristayaasha Wargeysyadda	goboladda ee dalka.																
	3.2 In la sameeyo wakiilo lixda goboladda ah oo u qaabilsan iibka wargeysyadda.	6 wakiil														Sawiro, Warbixin	
	3.3 In loo sameeyo gobolada xarumo wargeyska la dhigo, laguna iibiyo.	6 xarumood														Sawiro, Warbixin	
4. Dayactirka xafiisyada Xarunta Wargeysyadda	4.1 In xafiiska soo dhawaynta la casriyeeyo	1 xafiis														Sawiro, Warbixin	
	4.2 In xafiiska mashiinadda lagu rakibo 2 AC	2 AC														Sawiro, Warbixin	
5. Adkaynta Ammaanka Xarunta Wargeysyadda	5.1 In la dalbo lix kamaradood oo kuwa ammaanka ah.	6 kamaradood														Sawiro, Warbixin	
	5.2 In lagu rakibo kamaraddaha ammaanka goobaha loo asteeyey.	6 goobood														Sawiro, Warbixin	
	5.3 In loo asteeyo laba shaqaale ah oo si gaar ah ugu xilsaaran kamaraddaha ammaanka.	2 shaqaale														Sawiro, Warbixin	

6. Waaxda Idaacaddaha

Idaacadda Qaranka ee Reedhyow Hargeysa, oo ah Idaacadda ugu da'da weyn, uguna kaydka balaadhan Idaacadaha Af-Soomaaliga ku hadla, waxa ay ku hadasha afar luuqadood oo kala ah Af-Soomaali, Ingiriisi, Carabi iyo Amxaari. Qorshe-sannadeedka waaxdu waa sida hoos ku qoran:

Maxsuulka	Hawl-qabadka	Halbeeg	GOORTA LA FILAYO												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1. Casriyeynta iyo qalabaynta Sadexda Istuudiyow ee Idaacadda	1.1 In la helo 15 kombuyuutar oo ah nooca loo isticmaalo istuudiyaasha.	15kombuyuutar														
	1.2 In la qurxiyo (<i>décor</i>) lagu sameeyo saddexda istuudiyow ee Idaacadda.	<i>décorka</i> xafiiska														
	1.3 In la helo 50 cod duubayaal (<i>voice recorders</i>) iyo mikirifoonadoodii oo is wata.	50 microphone														
	2.1 In la qurxiyo (<i>décor</i>) lagu sameeyo qolka kaydka cajaladaha ee idaacada.	Décor														

2. Horumarinta iyo casriyeynta qolka kaydka cajalada Idaacadda	2.2 In 6000 oo cajaladood iskuguna jira maydhax iyo kuwa yaryar loo bedelo hab <i>digital</i> ah	6000 cajaladood															
	2.3 In lagu rakibo laba AC awood ahaan ku filaan kara qaboojinta qalabka yaala kaydka.	2 AC															
	2.4 In la helo shan rikoodh oo nooca reelka ah iyo saddex rikoodh oo nooca cajaladaha kaaseedka ah iyo shan koombuuter.	13 rikoodh															
	2.5 In la helo hal seefar oo lagu kaydiyo xogta cajaladaha la rogay.	1 seefar															

3. Tayeynta barnaamijyada Idaacadda gaar ahaan kuwa arimaha bulshada	3.1 In lixda gobol laga soo ururriyo macluumaadka barnaamijyada arrimaha bulshada.	Warbixinta															
	3.2 In dib-u-tayeyn lagu sameeyo barnaamijyadda Arrimaha bulshada gaar ahaan Tacab, Deegaanka, Caafimaadka, Arimaha Qoyska, Waxbarashada, Maaweeladda Carruurta, Kulan Gaar ah, Hiddaha iyo Dhaqanka, Dhallinyaradda, Riwaayadda Reedhyowga, Macallinka Bulshada iyo Nabadgelyada Wadooyinka	Jadwalka barnaamijyadda															
4. Helitaanka xafiis la socda hawlaha shaqo ee Idaacaddaha FM-ta ee goboladda Dalka yaala.	4.1 In la qalabeeyo xafiiska hawlgelinta	Qalabaynta xafiiska															
	4.2 In la diyaarinayo barnaamijka hawlqabadka xafiiska	Warbixinta Hawlqabadka															

7. Waaxda Telefishanka Qaranka Somaliland (SLNTV)

Waaxda Telefishanka Qaranka Somaliland (SLNTV) higsigeedu waa in bulshadda Somaliland ka haqabtirto wararka iyo barnaamijyadda la xidhiidha dhinaca horumarka, nabadda iyo wacyigelinta, si loo helo bulsho ka fayaw qabyaalada, kunna midaysan qarannimo iyo helitaanka qaran la aqoonsaday. Qorshe-sannadeedka waaxdu waa sida hoos ku qoran:

Maxsuulka	Hawl-qabadka	Halbeeg	GOORTA LA FILAYO												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1. Kordhinta tiradda Daawadayaasha Telefishanka Qaranka.	1.1 In la joogteeyo dhiirigalintii dhaqaale ee sannadkii hore bilaabantay, taas oo loo khaas yeelo barnaamijyadda joogtada ah.	Dhiirigelin Dhaqaale														
	1.2 In kala hufid lagu sameeyo barnaamijyadda xiisaha leh iyo kuwa aan lahayn.	Jadwalka Barnaamij yada														
2. Horumarinta iyo balaadhinta kaydka Telefishanka Qaranka.	2.1 In kaydka Telefishanka loo guuriyo habka <i>digital</i> -ka ah.	Kaydka TVga														

3. Kordhinta Wararka Telefishanka Qaranka	3.1 In bilowga warka laga dhigo 12:30 p.m	Jadwalka Wararka															
4. Helitaanka Istuudiyaal tabineed	4.1 In istuudiyaal tebineed laga hirgeliyo saddexda gobol ee kala ah: Laascaanood, Boorame iyo Burco	3 gobol															
5. Iibsiga gaadhi qalabaysan oo ah Istuudiyow (OBV)	5.1 In la fududeeyo tebinta iyo duubista barnaamijyadda ka baxsan istuudyaasha.	Gaadhi OBV															

8. Waaxda Filimada

Waaxda Filimadu waxa ay u aasaasan tahay sidii loo kobcin lahaa wax-soo-saarka filimada, kuwaas oo ku habboon habka gudbinta farriimaha wacyigelinta bulshadda ee khuseeya dhinacyada nabadgalyadda, dhaqanka, qabyaaladda, tahriibka, shaqo-abbuurka iyo horumarka. Qorshe-sannadeedka waaxdu waa sida hoos ku qoran:

Maxsuulka	Hawl-qabadka	Halbeeg	Goorta La Filayo												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1.Dhamaystirka Xafiiska iyo shaqaalaha Waaxda	1.1 In la qalabeeyo, lanna habeeyo hal xafiis oo maamulka ah iyo hal hool oo loo addeegso wax-soo-saarka filimada.	1 xafiis 1 hool														
	1.2 In la dhamaystiro shaqaalaynta 15 xubnood oo ka hawl-gali doona Waaxda, kuwaas oo laga soo-xulli doono Wasaaradda.	15 shaqaale														
2.Dhamaystirka Filimka <i>Shil Jacayl</i>	2.1 In la soo saaro filimka Shil Jacayl	1 filim														
3.Dhamaystirka Filmka Waddaniyadda	3.1 In la diyaariyo qoraalka sheekada filmka	Qoraalka Sheekada														
	3.2 In la duubo filimka Waddaniyadda	Duubista Filimka														
	3.3 In la soo saaro filimka Waddaniyadda	1 Filim														

4. Dhamaystirka Filimka Qabyaaladda	4.1 In la diyaariyo qoraalka sheekada filimka	Qoraalka Sheekada															
	4.2 In la duubo filimka Qabyaaladda	Duubista Filimka															
	4.3 In la soo saaro filimka Qabyaaladda	1 Filim															
5. Dhamaystirka filimka Wax-soo-saarka	5.1 In la diyaariyo qoraalka sheekada filimka	Qoraalka Sheekada															
	5.2 In la duubo filimka Wax-soo-saarka	Duubista Filimka															
	5.3 In la soo saaro filimka Wax-soo-saarka	1 Filim															
6 Dhamaystirka filimka Badbaadada Deegaanka	6.1 In la diyaariyo qoraalka sheekada filmka	Qoraalka Sheekada															
	6.2 In la duubo filimka Deegaanka	Duubista Filimka															
	6.3 In la soo saaro filimka Deegaanka	1 Filim															

9. Waaxda Dhaqanka

Waaxda Dhaqanku waxa ay u xil-saaran tahay kobcinta hiddaha iyo dhaqanka suuban ee bulshadda, horumarinta suugaanta iyo dhiirigelinta hal-abuurka, fanka iyo cayaaaraha Waddaniga. Qorshe-sannadeedka waaxdu waa sida hoos ku qoran:

Maxsuulka	Hawl-qabadka	Halbeeg	GOORTA LA FILAYO												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1. Samaynta ruwaayado Wacyigalineed	1.1 In la sameeyo Ruwaayado laga qabanayo dhammaan goboladda Somaliland, kuwaas oo ku saabsan: nabadgelyadda, Wax-soo-saarka, Arrimaha Bulshada, Waddaniyadda iyo Difaaca Qaranka	12 ruwaayado													Muuqaal, Sawiro, Warbixin	
2. Kordhinta barnaamijyadda Hiddaha iyo Dhaqanka	2.1 In dib-u-eegis lagu sameeyo tiradda iyo tayadda majaajilayaasha, hoboladda, suugaanyahanada iyo hal-abuurka Waaxda Dhaqanka															

	2.2 In la kala hufo kooxda dhaqanka si loo helo koox heeggan u ah diyaarinta barnaamijyadda degdega ah iyo kuwa muddada dheer.																
	2.3 In la curiyo gabayo, heeso iyo ciyaar dhaqameed ka turjumaya Hiddaha iyo Dhaqanka baadi-sooca u ah bulshadda Somaliland.	30 heesood, 10 gabay, 12 ciyaar dhaqameed															
	2.4 In la soo bandhigo suuggaaanta iyo hal-abuurka lixda gobol ee Dalka	6 gobol															
3. Kordhinta Tiyaatar iyo goobo masraxiyeed.	3.1 In qiimeyn dhamaystiran lagu lagu samayeeyo Tiyaatarka iyo Masraxiyadda	Warbixinta Qiimaynta															
	3.2 In la abbuulo laba kulan dadweyne si loo soo bandhigo ciyaar dhaqameed iyo suugaan lagu dhiirigelinayo Hiddaha iyo Dhaqanka soo jireenka ah ee bulshadda Somaliland.	2 Kuln Dadweyne															
	3.3 In barnaamij masraxiyadeed lagu soo bandhigo Tiyaatarka, iyadda oo diiradda la saarayo dhallinyaradda, dumarka iyo qaybaha bulshada ee nugul.	20 barnaamij masraxiyadeed															

10. Waaxda Wada-Xidhiidhka Qaranka

Waaxda Wada-Xidhiidhka Qaranku waxa ay u xilsaaran tahay sidii loo xoojin lahaa, loona horumarin lahaa wada-xidhiidhka hay'adaha iyo laamaha dawladda, dawladda iyo muwaadiniinta, dawladda iyo warbaahinta. Qorshe-sannadeedka waaxdu waa sidan hoos ku qoran:

Maxsuulka	Hawl-qabadka	Halbeeg	GOORTA LA FILAYO												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1.Dhamaystirka iyo balaadhinta Waaxda	1.1 In dib-u-dhis lagu sameeyo Dhismaha Hoolka Waaxda Wada-xidhiidhka.	Dhismaha Hoolka														
	1.2 In la qalabeeyo Hoolka Waaxda Wada-xidhiidhka	Dhismaha Hoolka														
	1.3 In la dhamaystiro qaab-dhismeedka waaxda iyo masuuliyiinta ku magacaaban	3 madax-qaybeed														
2. Diyaarinta Nidaamka/Habka Wada-xidhiidhka Dawladda (<i>Government Communication</i>)	2.1 In la soo ururiyo xogaha iyo macluumaadka la xidhiidha habka iyo nidaamka ay u shaqeeyaan Xafiisyadda Wada-xidhiidhka ee laamaha Dawladda	23 Wasaaraddood														

<i>Protocol</i>	2.2 In la diiwaangeliyo telefoonadda iyo cinwaanadda saraakiisha Xafiisyada wada-xidhiidhka laamaha Dawladda iyo qaybaha kala duwan ee warbaahinta gudaha iyo dibaddaba	24 Wasaaraddood														
	2.3 In la qabto saddex kulan wada-tashi oo lagu midaynayo hababka iyo qaababka wada-xidhiidh ee Dawladda	3 kulan														
	2.4 In la soo saaro buug-yaraha Habka Wada-xidhiidhka Dawladda	1 buug-yare														
	2.5 In la joogteeyo kulanada waaxaha wada xidhiidhka Dawladda	Kulano														

3. Qabashada Barnaamijka La Kulanka Warbaahinta	3.1 In la diyaariyo hab-raaca iyo hagaha Barnaamijka La Kulanka Warbaahinta	Hagge														
	3.2 In la asteeyo, lanna ogaado qaybaha Warbaahinta ee ugu saamaynta badan si ay qayb uga noqdaan barnaamijka La Kulanka Warbaahinta	Tirakoobka Warbaahinta														
	3.3 In lagu martiqaado Wasiiradda kulanka si Warbaahintu ula xisaabtano	4 martiqaad														

11. Waaxda Farsamadda

Waaxda Farsamadu waxa ay masuul ka tahay dhammaan qalabka warbaahineed ee Reedhyow Hargaysa, idaacadaha qalaad (sida BBCda iyo VOAda) iyo Telefishanka Qaranka. Waaxdu waxa ay si gaar ah ugu xil-saaran tahay kormeerka, dayactirka iyo ka warhaynta xaalada mishiinadda iyo qalabka farsamo ee Wasaaradda. Qorshe-sannadeedka waaxdu waa sida hoos ku qoran:

Maxsuulka	Hawl-qabadka	Halbeeg	GOORTA LA FILAYO												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1.Suggida amniga iyo badqabka Wasaaradda	1.1 In la rakibo 1300 oo guluub oo laydhka ammaanka ah	1300 guluub														
	1.2 In la helo 50 hammood oo dab-demiska gacanta	50 hammood														
	1.3 In la helo 12 dirays oo ah nooca ka hortaga shucaaca.	12 direys														
2. Iibsiga idaacad Mawjadda Gaaban oo awoodeedu dhan tahay 50 KW	2.1 In la qeexo tilmaamaha ay Idaacaddu yeelanayso.	Qoraalka Tilmaamaha														
	2.2 In si rasmi ah loo qandaraaso iibka Idaacadda	Bixinta Qandaraaska														
	2.3 In la dhiso dhismo u gaar ah Idaacadda Cusub	1 dhisme														
3.Balaadhinta iyo gaadhsiinta FM-yada Reedhyow Hargeysa	3.1 In la rakibo saddex FM-yada magaalooyinka Berbera, Gebiley, Burco.	3 FM														
	3.2 In la soo iibiyo laba kayd oo FM.	2FM														

magaalooyinka Dalka	3.3 In la soo iibiyo hal laambad(<i>Output Lamp</i>)	I laambad																	
4. Xoojinta awoodda warleliska Telefishanka gudaha, loona helo kaydkiisa.	4.1 In qeexo tilmaamaha ay warleliska TVga gudaha yeelanayo.	Buugga Tilmaamaha																	
	4.2 In si rasmi ah loo qandaraaso iibka warleliska TVga gudaha	Bixinta Qandaraaska																	
	4.4 In la dhiso dhismo u gaar ah warleliska TVga gudaha	1 dhisme																	
5. Casriyeynta iyo balaadhinta awoodda Telefishanka Qaranka	5.1 In Telefishanka Qaranka la gaadhsiiyo Waqooyiga Ameerika	TV Channels																	
	5.2 In la casriyeeyo, lana qurxiyo Istuudiyaha satelliteka ee Telefishanka Qaranka																		
6. Dayactirka dhismaha mishiinada.	6.1 In dib-u-dhis lagu sameeyo labada dhisme ee Mishiinaddu yaalaan.	2 dhisme																	

12. Waaxda Wacyigelinta

Waaxda Wacyigelintu waa waaxda u qaabilsan diyaarinta barnaamijyadda iyo farriimaha wacyigelineed ee Wasaaradda, iyada oo iskaashi gaar ah la leh waaxyaha warfaafinta iyo dhaqanka. Qorshe-sannadeedka waaxdu waa sida hoos ku qoran:

Maxsuulka	Hawl-qabadka	Halbeeg	GOORTA LA FILAYO												Habka Xaqiijinta	Faallo
			1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12		
1.Dhamaystirka iyo qalabaynta Waaxda	1.1 In la qalabeeyo Xafiiska Waaxda, lanna dhigo saddex kombuyuutar, saddex miis iyo saddex kursi	3kombuyuutar 3 miis 3 kursi														
	1.2 In la dhamaystiro shaqaalaha waaxda	12 shaqaale														
	1.3In la magacaabo saddexda madax-qaybood ee Waaxda	3 madax-qaybeed														
2. Qabashada dood-cilmiyeed lagu ogaanayo saamaynta ay Qabyaaladu ku leedahay bulshadda Somaliland	2.1 In loo qabto afar dood-cilmiyeed deegaanada kala ah Hargeysa, Burco Laascaanood iyo Boorama.	4 dood-dilmiyeed														
	2.2 In la bilaabo afar olole oo lagula dagaalamayo Aafada Qabyaalada.	4 olole														

3. Dib-u-eegista Qorshaha Wacyigelinta Qaranka.	3.1 In naqtiimid lagu sameeyo qabyo-qoraalka koowaad ee Qorshaha Wacyigelinta Qaranka.	Qabyo-qoraalka 1aad																
	3.2 In la qabto laba kulan lagu qeexayo farriimaha Qorshaha Wacyigelinta Qaranka.	2 kulan																
	3.3 In la diyaariyo qabyo-qoraalka labaad ee Siyaasadda Wacyigelinta Qaranka.	Qabyo-qoraalka 2aad																
4. Qabashada tartan suugaaneed lagu dhiirigelinayo Nabadgelyada	4.1 In la qoro hagaha iyo tilmaamaha wacyigelinta	Hagaha Wacyigelinta																
	4.2 In hal kulan oo hordhac ah loo qabto xullista ka qaybgalayaasha tartanka suugaaneedka Nabbada.	1 kulan																
	4.3 In la bilaabo tartanka suugaaneedka, lagana qaybgaliyo dhalinyaradda ku nool goboladda kala duwan ee Dalka	1 tartan																

FULLINTA QORSHE-SANNADEEDKA

Qorshe-sannadeedka 2020-2021 ee Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta Jamhuuriyadda Somaliland waa mid ku xidhiidhsan mudnaanaha Higsiga 2030 ee Qorshaha Horumarinta Qaranka II. Taas oo qeexaysa in la horumariyo, lanna balaadhiyo warbaahinta iyo xog-is-dhaafsigu hay'adaha dawladda, muwaadiniinta Somaliland loo ogolaado in ay sida ugu fudud u helaan war iyo wacaal ku dhisan xaqiiq iyo run xilli kasta oo loo baahdo. Sidaas darteed, Wasaaraddu waxa ay xaqiijinaysaa sida Dastuurka Qaranku dhigayo in saxaafadda Somaliland noqoto mid ay muwaadiniintu u addeegsadaan xorriyaadka asaasiga ah ee ra'ayi-dhiibashada, lanna damaanad qaado madax-bannaanidooda.

Si loo gaadho yoolka fog ee Wasaaradda, loona fulliyo ujeedooyinka qorshe-sannadeedka 2020-2021, maamulka iyo shaqaalaha wasaaraddu waxa ay iska kaashan doonaan sidii loo qiimayn lahaa tayada iyo xirfadda shaqaalaha, habka addeeg bixinta iyo nidaaminta isku xidhka waaxyaha iyada oo la samayn doono cilmi-baadhis iyo qiimayn joogto ah. Hawl-qabadyadda ugu muhiimsan ee lagu hubinayo fullinta qorshe-sannadeedku waxa ay noqon doonaan kuwa hoos ku xusan:

- Joogtaynta kullnada agaasime-waaxeedyada iyo madax-qaybeedyada si loo helo isla xisaabta dhab. Kullnadaas oo qabsoomi doona todobaad kasta hal mar.
- Waax kasta waa in ay qorshayaasheeda gaarka ah u fullisaa si madaxbannaan, iyada oo iskaashi la yeelan doonta waaxyaha kale meelaha ay shaqo wadaagta ka yihiin.
- Ku wargelinta iyo fahansiinta shaqaalaha Wasaaradda tiirarka iyo nuxurka Qorshe-sannadeedka si ay ula socon karaan heerarka kala duwan ee uu marayo fullinta qorshuhu.
- Hawlqabad kasta oo qorshe-sannadeedku wuxuu leeyahay halbeeg lagu cabirayo heerka fullintu marayso. Taas oo waax kasta ka caawin doonta in ay si dhaw ula socoto waxqabadkooda, qiimayn u gaar ahna samaysan karto.



KORMEERKA IYO QIIMEYNTA

Fullinta Qorshe-sannadeedka 2020-2021 wuxuu lagamamaarmaan ka dhigayaa in kormeeris iyo qiimayn muddaysan lagu sameeyo maxsuulka qorshaha. Kormeerka iyo qiimayntu waa hab lagu ururiyo, laguna falanqeeyo xogta, si loo helo warbixin lagu go'aan qaadan karo. Kormeerku waa hab joogto ah oo lagu hubinayo habsami-socodka qorshe-sannadeedka iyo mashaariicda ku lammaanba. Dhanka kale, qiimayntu waa hab lagu ogaanayo natijadda dambe ee qorshe-sannadeedka. Kormeerka iyo qiimayntu waa nidaam is-kaabaya oo lagu ogaanayo heerka uu gaadhsiisan yahay fullinta Qorshe-sannadeedka 2020-2021.

Kormeerka iyo qiimayntu waxa ay u leeyihiin muhiimad gaar ah Fullinta Qorshe-sannadeedka 2020-2021. Waxa ay kor u qaadaan heerka isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta, cadaynta jihadda loo socdo, kor qaadista heerka wadashaqaynta waaxyaha Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta JSL iyo danneeyayaasha kale. Sidaas darteed, si kor loogu qaado hufnaanta addeegyadda ay Wasaaraddu bixiso, kormeerka iyo qiimayntu waxa diiradda saari doonnaan tayadda iyo tiradda mashaariicda iyo isku-dheelitirnaanta miisaaniyadda Wasaaradda.

Shaqaalaha Xafiiska Kormeerka iyo Qiimeynta ee Waaxda Qorshaynta iyo Istaastikadda Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelintu JSL waxa ay kormeer ku samayn doonnaa qorshe-sannadeedka, iyaga oo soo saari doona Warbixinta Kormeerka (*Monitoring Report*) oo saddex biloodle ah. Sidoo kale, Xafiisku wuxu qiimayn lix biloodle ah ku samayn doona Waaxyaha Wasaaradda iyo isku-duwayaasha Goboladda Dalka, wuxuuna soo saari doonnaa Warbixinta Qiimeynta (*Evaluation Report*). Nuxurka labada warbixinoodba waxa ay si joogto ah loola wadaagi doona Wasiirka, Wasiir-ku-xigeenka iyo Agaasimaha Guud, isla markaana waxa laga akhriyi doonnaa shirka Agaasime-waaxeedyada si loo helo isla xisaabtan dhab ah, loona oggaado heerarka kala duwan ee ay marayso Fullinta Qorshe-sannadeedka 2020-2021. Waaxda ama waaxaha si dhammaystiran u fulliya qorshe-sannadeedka waxa lagu abbaalmarin doona shirweynaha Wasaaradda ee sannadlaha ah.

Waaxda Qorshaynta iyo Istastikadda

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta ,
Email: planningmoicg@gmail.com | **Tell:** + 252634100120

Web: www.warfaafintajsl.com

Cinwaan: Degmadda 26ka June, Wadadda Idaacadda